

## Codsiga Helidda Adeegyo Meelmarin Taageero Caawimo-la'aan

### Application for Nonassistance Support Enforcement Services

#### Tilmaamo

Si taxadir leh u akhri foomkan. **Buuxi foomka Wareejinta Taakulaynta Ilmaha, Caddeynta Lacag bixinada Taakulaynta, iyo foomkan.** Kusoo celi foomamka oo buuxa Qeybta Taageerada Ilmaha (DCS) ciwaankooda ku yaal bogga 4. Wixii aan ka ahayn saxiixaaga, daabac jawaabahaaga adigao Isticmaalaya qalin kaliya ah buluug ama madow ah.

#### Macluumaadka Aniga igu Saabsan

MAGACA (HORE, DHEXE, DAMBE)	LAMBARKA TALEEFANKA (       )	LAMBARKA SOOSHAL SEKUURITIGA
CINWAAN WADDO	MAGAALO	GOBOL
		SIB KOODH

#### Macluumaadka ku Saabsan Waalidka aan Ilmaha (Caruurta) Hayn

MAGACA (HORE, DHEXE, DAMBE)

#### Biximo

Anigu waan fahmay ina ay DCS iigu soo diri karto masaariifayda habka ku wareejinta elekteroonigga (EFT) iyagoo lacagta si toos ah iigu shubaya xisaabtayda (akoonkeyga) bangiga ee jeegga ama keydka. Anigu waxaan oggolaanayaa in lacagtaas si toos ah la iigu soo shubo anigoo buuxiyey macluumaadka akoonka bangiga hoosta ka soo scoda. **(Ku lifaaq jeeg fasad laga dhigay.)**

Magac Bangi

Lambarka Aqoonsiga Bangiga

Jeeg Qor       Keydin

Lambarka Akoonka Bangiga

**Haddii aanan anigu idman lacag dhigid toos ah, xafiiska DCS wuxuu si otomaatik ah anigu iigu soo diri doonaa VISA kaar-qiime leh dhebit ah, oo la dhaho kaarka deynta DCS "DCS Debit Card".** Haddii ay DCS igu qoraan barnaamijka kaarka deynta DCS (debit card), DCS waxay soo dhigi doontaa taageerada ilmaha kaarkaas halkii ay ku shubi jireen koontada baanka. Inta ugu badan, taageerada carruurta waxay diyaar iigu tahay akoonkeyga bangiga ama kaarkeyga deynta DCS (debit card) saddex casho oo shaqo gudaheed marka lacagta lagu soo shubo keeskeyga. Kaarka deynta DCS (debit card) waxaa lagu isticmaali karaa meel kasta oo laga aqbalo kaarka VISA iyo mashiinada lacagta lagala baxo ee loo yaqaan ATM-ka. Anigu waxaan heli karaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan habka lacag bixinta elektrooniga ah, ama waxaan heli karaa sidii aan ku ogaan lahaa hababka kale ee lacag bixinta, aniga oo waca, 800-468-7422 ama qadka internet-ka ee ku taal [www.dshs.wa.gov/esa/division-child-support](http://www.dshs.wa.gov/esa/division-child-support).

#### CADDEYN

Anigu waxaan caddeynayaa:

1. In aanan qaadanin oona weydiisan adeegyo taageero meelmarin dawlad gobol ama awood kale.
2. In aan anigu hayo ilmaha (carruurta) kuwaas oo aan taageeradooda hadda raadinayo ama aan anigu hayay ilmahaas (carruurtaas) muddada ay deynta taageeradaasi dhacday.
3. In aan haysto oggolaanshaha xanaanada sharciga ah ee lagu xanaanaynayo caruurta.
4. In aanan si khaldan uga reebin xanaanada sharciga ah ee la xanaaneeyo carruurta.
5. In aanan anigu ku qaadanin caawinaada bulshada ah carruurta.

Anigu waxaan caddaynayaa iyadoo sida ku xusan xeerka ciqaabta haddii dembi yimaaddo sida ku xusan shuruudka u yaal gobolka Washington in waxyaabaha aan kor ku soo sheegay ay run iyo sax yihiin.

SAXIIX	GOOBTA LAGU SAXIIXAY	TAARIIKH
--------	----------------------	----------

Qiritaanka khuseeya lacag bixinada lagu diro si khaldan iyo/ama lacag bixinada dheeraadka ah: Aan ka ahayn haddii aan saaro calaamada "Maya" khaanada hoose, sixiixayga ku qoran codsigaan wuxuu siinayaa Qaybta Taakulaynta Ilmaha (DCS) oggolaansho lagu celinayo illaa boqolkiiba 10 oo ah lacag bixinadayda taakulada ilmaha hadda ah iyo dhammaan lacag bixinta hore-la iigu lahaa ee lagu sameeyo kiiskan aan ka ahayn haddii lacag bixinada lagu diray si khaldan loo bixiyay si buuxda.

Maya. Fadlan ila soo xiriir kahor inta aadan isku dayin in aad dib u bixisid lacag bixinta lagu direy si khaldan ee ka ahaatay lacag bixinadayda taakulada mustaqbalka ah.

DCS waxay siin doontaa isla heerka fulinta buuxa ee adeegaha haddii aan saaro calaamada "Maya" khaanada iyo haddii aanan saarinba. DCS waxay isticmaali kartaa qaabab kale oo lacag aruurin ah si dib loogu bixiyo lacag bixinta si khaldan loo diray, midaas oo ay kamid noqon doonto xajin dakhli iyo tallaabooyin kale oo lagu oggolaaday hoosta RCW 74.20A.270.

Anigu waxaan doonayaa in ay DCS ii qabato adeegyada meelmarinta taageerada ilmaha aniga iyo caruurta. Anigu waxaan doonayaa in ay DCS oggolaato oo ay igu soo wareejiyo dhammaanba lacag bixinta taageerada ilmaha (jeegagga, "money order"-ada, lacag ku wareejinta Elektarooniga, iwm.) ee aniga la iis soo ururiyey..

Haddii aan hadda ka helo lacag bixinta taageerada ilmaha maxkamad gobol ama qabaa'il hayaddiisa taageerada ilmaha, anigu waxaan doonayaa in ay maxkamaddaasi ama hayaddaasi u soo dirto dhammaanba lacag bixintayda DCS.

Anigu waan aqriyay oo fahmay foomka **Macluumaadka Meelmarinta Taageerada Caawimo- La'aanta** ee la socotay codsigaan.

Waxaan anigu fahmay in:

1. DCS waxay igu dallacdaa aniga \$35 ujro sannad kasta ah haddii aanan weligayga qaadanin Caawinaada Ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska u Baahan (TANF), TANF Qabaa'ilka ah, ama Caawinaada Qoysaska Leh Carruurta Ku Tiirsan (AFDC) ee loogu talagalay carruurta kamidka ah qoyskayga. DCS waxay haysanaysaa lacagtan (inta u dhaxaysa<sup>1da</sup> Oktoobar iyo 30<sup>ka</sup> Sibtembar) ee wixii taageero ilmaha ah ee lasoo aruuriyay kadib marka ay DCS i siiso \$550 oo ah lacag bixinta taageerada ilmaha ee ku saabsan kiiska ku jira muddada sannadka dowlada federaalka. Haddii aan leeyahay wax ka badan hal kiis, waxaa laga yaaba in la igu dallaco kiis walba goonidiis midkii \$ 550 la iga siiyaba. **Haddii aan qaato TANF, TANF-ka Qabaa'ilka ah, ama AFDC oo aan ka qaato gobol kale waxaa qasab igu ah inaan soo caddeeyo midaas, sida bayaanka dhaarashada oo laga keeno dhinaca haya'dda caawinaada bulshada ama koobi shahaado ah oo ku saabsan diiwaanadayda caawimaada, una keeno DCS. DCS waxaa laga yaaba in ay igu dallacaan lacag ilaa iyo inta aan ka keenayo caddeyntaasi. Haddii bixinta lacagta \$35 ay dhibaato u keenayso qoyskaaga, waxaa dhici karta in aan codsado ka reebid la iga reebo codsashada Guddiga Shirka.**
2. Haddii xafiiska DCS kiiskayga u gudbiyo dawladda kale si loo meelmariyo, waxa laga yaabaa in dawladda kale ay qaaddo fii ah adeeggaas gaarka ah. Waxaana laga yaabaa inay dawladda kale la harto fiigaas iyadoo u haysaneysa qeyb ka mid ah lacagta aruurintataageerada ilmaha.
3. DCS waxay u baahan doonaan in ay magacayga iyo magacyada caruurteyda u gudbiyaan waalidka aan carruurta hayn.
4. Aniga waxaa qasab igu ah inaan lambarka social securitiga siiyo DCS. DCS waxay u isticmaali doontaa lambarkaaga haqabeelka beesha (SSN) ee ujeedooyinkeeda meelmarinta taageero ilmo sida lagu qeexay xeerka Title IV-D ee Sharciga "Social Security Act".
5. DCS ma awoodo inay soo aruuriso deynta taageerada carruurta ee waqtigeeda sharcigu dhacay.
6. DCS kuma ay qasbi karto dadka ah qabaa'ilka Hindida, baayac mushtarka ay qabaa'ilka Hindidu leeyihiin, iyo baayac mushtarka Hindidu leedahay ee ku yaal dhulka loo qoondeeyay dadka Hindida ah inay ka xayiraan Taageerada carruurta dakhliga la siiyo waalidka aan carruurta hayn. Haddii qabaa'ilka iyo DCS ay ka dhaxayso heshiis ay sidaas ku sameeyaana, DCS waxay weydiisan doonaan qabaa'ilku inay dhaqan geliyaan amarka taageerada carruurta.
7. DCS waxay ku qori doonaan amarka taageerada carruurteyda Diiwaanka Taageerada Carruurta Washington (WSSR).
8. Haddii aan leeyahay amar maxkamadeed oo ka doonaya waalidka aan carruurta hayn in uu taageerada carruurta ku bixiyo WSSR, keyskaygu waxa uu ku sii jiri doona diiwaanka WSSR illaa iyo inta ay maxkamadu ka fasaxi doonto amarkeyga.
9. DCS waxay u qeybin doonaan taageerada la ururiyey ee carruurta ee kiiskayga sida ay farayaan sharuucda gobolka iyo federaalka. DCS ayaa:
  - a. U xisaabin taageerada carruurta bishii la helay.
  - b. Ii soo diraan taageerada carruurta ee marka. (Haddii uu waalidka aan carruurta hayn uu leeyahay wax ka badan hal amar oo taageero carruureed ah iyo lacagta laga haya ee ururtey aanay ku wada filnayn dhammaanba taageerada carruurta hadda, DCS waxay markaa si siman ugu qabin doonta lacagta keyskaas.)
  - c. Ka haystaan sannad kasta ujro lacag bixin gaareysa \$35 (inta u dhaxaysa <sup>1da</sup> Oktoobar iyo 30<sup>ka</sup> Sibtembar), haddii aanan anigu weligayga qaadanin mucaawinooyinka AFDC, TANF, ama lacagaha TANF-ta Qabaa'ilka ah ee aan u qaato sida ahaanshahayga xanaaneeyaha carruurta yar-yarka ah, kadib markii \$550 oo ah taageerada carruurta la iga siiyo dhinaca kiiskayga sannadkiiba.
  - d. U xisaabaan u soo ururinta carruurta ee ka badan halka bil taageeradeeda wixii ka soo hara deymihii horay loogu lahaa keyska (haddii ay jiraan).
  - e. Haddii aan hore u heli jiray kaalmada "TANF" amase "AFDC", DCS waxay u qeybin doonaan deymihii hore ee taageerada carruurta ee la helay (laga reebo biximaha laga helo Laanta Cashuuraha (IRS)) sida soo socota:
    - (1) Marka koowaad, wixii taageero xilligeedii dhaaftay ah ee aniga iga maqan ee aan weligeed lagu asteynin dawladda.
    - (2) Marka labaad taageero xilligeedii dhaaftay ee si ku meelgaar ah lagu asteeyey dawladda gobolka.
    - (3) Marka saddexaad, taageero kasta oo xilligeedii dhaaftay oo aniga ii maqan oo loogu talagalay taageerada caafimaadka caruurteyda..
    - (4) Marka afaraad, taageerada xilligeedii dhaaftay eesi joogta ah lagu asteeyey dawladda asteyn caawimo dawladdedeed oo la sameeyey ka hor Oktoobar 1, 1997, amase la asteeyey taariikhdaas sababtoo ah deeq caawimo dadweyne oo aniga la i siiyey bishaas.
    - (5) Marka shanaad, caawimo caafimaad oo lagu asteeyey dawladda gobolka.

10. Ururinta laga helay IRS, ee lagu hagaajiyey taageerada xilligeedii dhaaftay. Biximaha IRS ayaa loo qaybin sida socota ee ay iskugu daba xigaan.
  - a. Marka koowaad, wixii taageero xilligeedii dhaaftay ee aan weligeed lagu asteynin dawladda.
  - b. Marka labaad, taageerada xilligeedii dhaaftay ee loo asteeyey si joogto ah.
  - c. Marka saddexaad, taageerada lacageed xilligeedii dhaaftay ee loo asteeyey ku meel-gaar ah.
  - d. Marka afraad, wixii taageero xilligeedii dhaaftay ee aan weligeed lagu asteynin dawladda.
11. WAC-388-14A-2037 ayaa sharaxaysa lacagta maqan sida joogtada ah ee la asteeyey. WAC-388-14A-2037 ayaa sharaxaysa lacagta maqan sida ku-meel gaarka ah loo asteeyey.
12. Anigu waa inaan u soo celiyaa lacagta DCS ay siiso haddii:
  - a. DCS ay iigu soo dirto lacag si khalad ah.
  - b. Qaato lacag ka baddan deynta lagu leeyahay waalidka aan-xanaanada ahayn (sidoo kale lagu magacaabo lacag bixinta dheeraadka ah)
13. DCS waxaa dhici karta in ay dib u celiso lacag bixinta dheeraadka ah iyo/ama lacag bixinta khaladka ah ayada oo iga xajisa taakulada ilmaha mustaqbalka ah, ayada oo aan la i siinin oggaysiis dheeraad ah. Midaan waxaa lagu magacaabaa “magdhow” waxaana laga oggolyahay dhinaca RCW 26.23.035(3). Waxaan ku codsan karaa in aan ku qoro bogga koowaad ee codsigaan in DCS ila soo xiriirto kahor inta aanan raadin lacag celinta magdhowga ah. DCS waxay ila soo xiriiri kartaa wakhti dambe si aan u raadiyo oggolaansho magdhowga ah ama in si qoraal ah la iigu soo wargeliyo in DCS ay qorshaynayso in ay dib iigu soo celiso lacag bixinta magdhowga ah aan ka ahayn haddii aan ka jawaabo. Marka DCS ay awood u leedahay ay dib ugu celiso magdhowga, waxaa dhacaya arimahaan soo socda:
  - a. DCS waxay xajinaysaa illaa boqolkiiba 10 oo lacag bixintayda taakulada hadda ee mustaqbalka ah.
  - b. DCS waxay xajinaysaa illaa boqolkiiba 100 oo lacag bixinta taakulada deyntayda-hore ah ee mustaqbalka ah..
14. DCS waxay qaadan kartaa tallaabooyin kale oo lacag aruurin ah oo lagu oggolaaday RCW 74.20A.270 waxa uu u oggolaanaya DCS in ay dib ula soo noqoto lacagihii dheeraadka ahaa iyo/ama lacagaha la iigu soo diray si khaldan. Middani wey socon doontaa xitaa haddii ay lacagtii taageerada ilmaha ahayd ee ay DCS i siin jirtay ay istaagto. DCS waxay dooranaysaa doorashadaan, DCS waxay isiin doontaa oggaysiis. Haddii aan la helin wax diidis ah, DCS waxaa loo oggolyahay in ay
  - a. U diraan loo-shaqeeyahayga ama qofkii kale ama ururukii ii haya hanti ***Ka Xayiridda Daqliga ee taageerada Carruurta***. Amarkaas/oggaysiintaasi waxay fari doontaa shaqadaada ama qofka kale ama ururka inay kaa xayiraan cadadka lacag bixinta khaladka ah iyo/ama lacagaha dheeraadka ah ee laga qaato kasabkayga, dakhligayga, iyo hantidayda.
  - b. Sameeyaan fayl dacwad ay kula wareegayaan hantideyda shaqsiga.
  - c. Isticimaalaan wax kasta oo hagaajin lacag aruurin DCS ah oo lagu helo hoosta Cutubyada 26.09, 26.18, RCW 26.23, iyo RCW 74.20 RCW
15. RCW 26.23.110 waxa uu u oggolaanayaa DCS inay ka soo qaadaan qarashyada caafimaadka (oo ay ku jiraan qeybta caymiska kaga soo aada, iyo kharashka caymiska sida uu qorayo WAC 388-14A-1020) ku baxay magaca caruurta ee aan anigu bixiyay xaaladaha qaarkood. DCS waxay sidaan ku sameyn kartaa iyadoo:
  - a. Yareysa deynta aniga iga maqan.
  - b. Hoos u dhigta lacagtii taageerada carruurta ee anigu aan qaadan jiray wax aan ka badnayn boqolkiiba 50 bil walba muddo sannad ama ka yar ah.
  - c. Ii furaan xisaab cusub oo ka soo aruurin ah oo aniga iga soo hor jeeda iyagoo isiticmaalaya habkii ay heli karaan ee ay wax iiga qaadi karaan (wixii aan ka ahayn inay xayiraan lisenkayga) sid akor ku qoran.
16. Haddii amarkaaga taageradeydu u leeyahay ka filitaan ah inaad bixiso lahaansho caymis caafimaad, DCS ayaa dhici karta inay dhaqan-galiso ka filitaanka haddii waalidka ilmo-ma-hayaha ahi u codsado. Meelmarinta waxa ka mid noqon kara dhidbinta xilka lacagta caafimaadka ee qaddaryada bishii, oo ah ineyna ka badan boqolkiiba 25 saldhigga xilka taageerada ilmaha sida lagu muujiyey xaashiyaha-shaqada ee amarkeyga taageero.
17. Xafiiska DCS wakiil kama aha aniga ama dhinaca kale ee amarkeyga taageero ilmaha. Si aan ku ilaaliyo danahayga, anigu waa inaan ka soo qeyb galaa dhammaanba dhagaysiyada dacwada ama imaanshada maxkamada wixii ku saabsan arimaha masaariifta carruurta. Haddii aan iman waayo oo aan ka qaybgali waayo, Garsooraha Maamulka Sharciga ayaa waxa laga yaaba inuu u oggolaado DCS waxyaabaha ay ka codsadaan oo dhanba ama dhinaca kale ee dacwada anigoon wax ogaysiin ah oo kale la i siin.
18. Anigu waan fahmay in ay DCS iigu soo diri karto biximahayga taageero habka ku wareejinta elekteroonigga (EFT) iyagoo lacagta si toos ah iigu shubaya xisaabtayda (akoonkeyga) bangiga. **Haddii aanan anigu idman lacag dhigid toos ah, xafiiska DCS wuxuu si otomaatik ah anigu iigu soo diri doonaa VISA kaar-qiime leh dhebit ah, oo la dhaho kaarka deynta ee DCS “DCS Debit Card”.** Haddii ay DCS igu qoraan barnaamijka kaarka deynta DCS DCS waxay ii soo dhigi doontaa taageerada ilmaha kaarkaas halkii ay ku shubi jireen koontadeyda baanka. Inta ugu badan, taageerada carruurta waxay diyaar iigu tahay akoonkeyga bangiga ama kaarkeyga deynta DCS saddex casho oo shaqo gudaheed marka lacagta lagu soo shubo keeska. Kaarka deynta DCS waxaa lagu isticmaali karaa meel kasta oo laga aqbalo kaarka VISA iyo mashiinnada lacagta lagala baxo ee loo yaqaan ATM-ka. Anigu waxaan heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka lacag bixinta elektrooniga ah, ama waxaan heli karaa sidii aan ku ogaan lahaa hababka kale ee lacag bixinta, aniga oo waca, 800-468-7422 ama aan tago qadka internet-ka ee ku taal [www.dshs.wa.gov/esa/division-child-support](http://www.dshs.wa.gov/esa/division-child-support).
19. DCS waxaa laga yaaba inay igu soo diraan ogaysiinta boostada kowaad.

Anigu waxaan ogolaaday in:

1. U soo diro DCS dhammaanba lacagaha taageerada ah ee aan ka helo qof kale oo aan ahayn DCS. Aniga waxaa qasab igu ah in aan lacagahaas sideed casho gudahood ugu soo diro DCS.
2. Ugu Sheego DCS sida ugu dhaqsaha badan haddii ay caruurteydu qaataan mid kasta oo kamid ah lacag bixinadaan soo socda ee lagu qaato magaca waalidka aan xanaanada ahayn. Waalidka aan xanaanada ahayn waxaa dhici karta in uu qaato deynta lacag bixinta taakulaynta loogu talagalay dheefta lacag bixinta ay caruurtaadu qaataan. Waxaa dhici karta in lagu weydiisto in aad xaqiijiso lacag bixinadaan. Haddii deynta labixinayo tusto in waalidka aan xanaanada ahayn uu qaato lacag bixin dheeraad ah, waxaa lagaaga baahnaan doonaan in aad dib u bixisid tirada lacagta dheeriga ah. Guud ahaan, qofka haya xanaanada caruurta waxaa khasab kugu ah in uu codsado dheefahaan.
  - a. Dheefta laga bixiyey dhinaca Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ama magdhowga dheefta shaqaalaha laga bixiyey ceymistaha-shakhsiga ah ee labixiyey kadib Luulyo 1. 1990.
  - b. Dheefta kutiirsanaha naafada ah ama dheefta hawlgabka ka ahaata Maamulka Dammaanada Bulshada la bixiyey kadib Luulyo 1, 1990.
  - c. Qayb dheefo ah oo ka ahaata dhinaca Waaxda Arimaha Halyeeyada hore ee ah marka ay tahay ama kadib Luulyo 24, 2015.
3. U sheego DCS haddii aan weydiisto hay'ad ama qof kale in ay ii soo aruuriyaan masaariifta ilmaha.
4. U sheego DCS haddii cimwaankeygu ama cinwaanka caruurtaaydu isbaddelo.
5. U soo diro DCS dhammaanba koobiyada amarrada taageerada carruurta ee wax ka badelaya sharuudaha masaariifta ama haynta caruurta lagu qorey kiiskeyga.

Haddii su'aalo aad qabtid, la xiriir:

DIVISION OF CHILD SUPPORT

PO BOX 11520

TACOMA WA 98411-5520

Ku tirsan \_\_\_\_\_ agagaaraha wicitaan: \_\_\_\_\_

Ka baxsan \_\_\_\_\_ agagaaraha wicitaan: \_\_\_\_\_

Waa la helayaa adeegyada TTY/TDD ee loogu tala galay dadka dhagaha culus amase hadalku dhibayo.

Ku booqo bartayada internetka halkan: [www.dshs.wa.gov/esa/division-child-support](http://www.dshs.wa.gov/esa/division-child-support)

Qofna lama takoori karo xagga shaqaaleynta, adeegyada, amase dhinacyada kale hawlaha barnaamijkan iyadoo sabab looga dhigayo jinsiyad, qowmiyadda uu ka soo jeedo, millada, diinta, lab/dheddig-nimo, da', amase naafanimu. Haddii la codsado, waxa la heli karaa foomkan oo hab kale u qoran.

Kaarka Bangiga Mareykanka (U.S. Bank ReliaCard)<sup>®</sup> Shaacinta  
 Hor-u-qaadashada  
 Magaca Barnaamijka: Washington Division of Child Support (Qeybta  
 Taageerada Carruurta ee Washington)  
 Taariikhda Tixraaca: Juun 2017

Waxaad haysataa fursad ah sida aad ku heli lahayd lacagtaada, oo ay ku jirto lacag dhigashada tooska ah ee koontada bangigaaga ama kaarkan horbixinta. Weydii wakiilkaaga fursadaha la heli karo oo dooro fursadaada.			
Khidmada bil kasta <b>\$0</b>	libsi kasta <b>\$0</b>	Lacag kala bixida ATM-ka hawada ku jira <b>\$0.99*</b> hawada ka baxsan	Lacag ku shubid <b>Ima Khuseeyo</b>
Weydiinta Baaqiga ATM-ka (hawada ku jira ama hawada ka baxsan)			\$0
Adeegga Macmiilka (iswada ama wakiil toos ah)			\$0 wicitaan kasta
Isticmaal la'aan			\$0
<b>Waxaan qaadnaa 3 nooc oo khidmad kale ah. Mid ka mid ah waa:</b>			
Kaar Beddelka (bixinta caadiga ama degdega ah)			\$0 ama \$15.00
<p>* Khidmadani waxay noqon kartaa mid hooseeysa iyadoo ku xiran hadba sida iyo meesha lagu isticmaalo kaarkan. Eeg jadwalka Khidmada ee la socda si aad u hesho siyaabo bilaash ah aad ku isticmaashid macluumaadka lacagtaada iyo baaqigaaga.</p> <p><b>Lama ogola deyn/amaah dheeraad ah.</b> Lacagtaadu waxay u qalantaa caymiska FDIC.</p> <p>Wixii macluumaad guud ee ku saabsan koontooyinka horbixinta, booqo <a href="http://cfpb.gov/prepaid">cfpb.gov/prepaid</a>. Ka raadi faahfaahinta iyo shuruudaha dhammaan khidmadaha iyo adeegyada gudaha xirmada kaararka ama wac <b>1-866-363-4136</b> ama booqo <a href="http://usbankreliacard.com">usbankreliacard.com</a>.</p>			

# Kaarka Bangiga Mareykanka ReliaCard® Jadwalka Khidmada

Magaca Barnaamijka: Washington Division of Child Support (Qeybta Taageerada Carruurta ee Washington)

Taariikhda Dhaqangalka: Maayo 2018

Dhammaan khidmadaha	Caddada	Faahfaahinta
<b>Hel lacag caddaan ah</b>		
Lacag kala bixida ATM-ka (hawada ku jira)	\$0	Tani waa khidmaddeena la-bixid kasta. "Hawada ku jira" waxaa loola jeedaa shabakadaha Bangiga Mareykanka ama MoneyPass® ATM. Goobaha waxaa laga heli karaa <a href="http://usbank.com/locations">usbank.com/locations</a> or <a href="http://moneypass.com/atm-locator">moneypass.com/atm-locator</a> .
Lacag kala bixida ATM-ka (hawada ka baxsan)	\$0.99	Tani waa khidmaddeena la-bixid kasta. Khidmadani waxaa lagaa dhaafay 2-da ugu horeeya ee kala bixida lacag ATM-ka bil kasta, taasoo ay ku jirto kala bixida lacag ATM-ka (hawada ka baxsan) iyo kala-bixida lacag ATM-yada caalamiga ah labadaba. "Hawada ka baxsan" waxaa loola jeedaa dhammaan ATM-yada ka baxsan shabakadaha Bangiga Mareykanka ama MoneyPass ATM. Waxaa sidoo kale kugu soo dallici kara khidmad howlwadeenka ATM-ka xitaa haddii aadan dhameystirin isweydaarsiga ganacsiga.
Kala bixida Lacag-bixiyaha Bangiga	\$0	Tani waa khidmaddeena marka aad kala baxdid lacag caddaan ah kaarkaaga adigoo la jooga lacag-bixiye bangiga ama is-kaashato aqbalaan Visa®.
<b>Macluumaadka</b>		
Weydiinta Baaqiga ATM-ka (hawada ku jira)	\$0	Tani waa khidmaddeena baaqi weydiin kasta. "Hawada ku jira" waxaa loola jeedaa shabakadaha Bangiga Mareykanka ama MoneyPass ATM. Goobaha waxaa laga heli karaa <a href="http://usbank.com/locations">usbank.com/locations</a> ama <a href="http://moneypass.com/atm-locator">moneypass.com/atm-locator</a> .
Weydiinta Baaqiga ATM-ka (hawada ka baxsan)	\$0	Tani waa khidmaddeena baaqi weydiin kasta. "Hawada ka baxsan" waxaa loola jeedaa dhammaan ATM-yada ka baxsan shabakadaha Bangiga Mareykanka ama MoneyPass ATM. Waxaa sidoo kale kugu soo dallici kara khidmad howlwadeenka ATM-ka.
<b>Ku isticmaalida kaarkaaga meel ka baxsan Mareykanka.</b>		
Isweydaarsiga Ganacsiga Caalamiga ah	2%	Tani waa khidmaddeena taas oo khuseysa markaad u isticmaasho kaarkaaga ka iibsiga ganacsatada ajnabiga ah iyo la bixida lacag caddaan ah ATM-yada ajnabiga ah waana boqolleeyda caddada doolarka, ka dib sarifashada lacag kasta. Ganacsatada qaarkood iyo isweydaarsiga ganacsi ee ATM-yada, xitaa haddii adiga iyo/ama ganacsadaha ama ATM-ka kku yaalo gudaha Mareykanka, waxaa loo tixgeliyaa isweydaarsi ganacsi hoos imaanaya sharciyada shabakada lagu dabaqi karo, mana xakameyno sida ganacsatadan, ATM-yada iyo isweydaarsiyada ganacsi loo kala qaybiyay ujeedadan awgeeda.
Kalabixida ATM-ka Caalamiga ah	\$2.50	Tani waa khidmaddeena la-bixid kasta. Khidmadani waxaa lagaa dhaafay 2-da ugu horeeya ee kala bixida lacag ATM-ka bil kasta, taasoo ay ku jirto kala bixida lacag ATM-ka (hawada ka baxsan) iyo kala-bixida lacag ATM-yada caalamiga ah labadaba. Waxaa sidoo kale kugu soo dallici kara khidmad howlwadeenka ATM-ka xitaa haddii aadan dhameystirin isweydaarsiga ganacsiga.
<b>Kale</b>		
Kaar Beddelka	\$0	Tani waa khidmaddeena kaar beddel kasta lagugu soo diro bixinta caadiga ah (ilaa 10 maalmood oo shaqo).
Kaar Beddelka Degdega	\$15.00	Tani waa khidmaddeena ee bixinta degdega (ilaa 3 maalmood oo shaqo) oo lagugu dalacay marka lagu daro khidmada Kaar Beddel kasta.

Lacagtaadu waxay u qalantaa caymiska FDIC. Lacagtaada waxaa la gayn doonaa Ururka Qaranka ee Bankiga Mareykanka, hay'ad ay caymiso FDIC, oo la caynshay ilaa \$250,000 haddii ay dhacdo in Bangiga Mareykanka musalafa. Ka eeg [fdic.gov/deposit/deposits/prepaid.html](http://fdic.gov/deposit/deposits/prepaid.html) wixii faahfaahin ah.

Lama ogola deyn/amaah dheeraad ah.

Kala xiriir Adeegyada Kaarlaha adoo wacaya **1-866-363-4136**, boosto ugu dir P.O. Box 551617, Jacksonville, FL 32255 ama booqo [usbankreliacard.com](http://usbankreliacard.com).

Wixii macluumaad guud ee ku saabsan koontooyinka horbixinta, booqo [cfpb.gov/prepaid](http://cfpb.gov/prepaid). Haddii aad qabto cabasho ku saabsan koontada horbixinta, ka wac Xafiiska Ilaalinta Maaliyadda Macaamilka 1-855-411-2372 ama booqo [cfpb.gov/complaint](http://cfpb.gov/complaint).

Inkasta oo xiriirka Bangiga Maraykanka uu ku baxayo Af Soomaali, hadana dhammaan xiriirada soo socdaa kuma bixi doonaan luqaddaas. Qaar ka mid ah adeegyada iyo waraaqaha, oo ay ku jiraan dukumiintiyada muhiimka ah ee la xiriira furitaanka iyo dayactirka alaabtayada (sida heshiisyada iyo bayaanada koontooyinka), lambarada telefoonada qaarkood, bogagga shabakadaha, iyo xiriirada kale ee Internet-ka ayaa lagu heli karaa oo keliya Af Ingiriisi. Turjubaannada madax-bannaan ee kale ayaa la heli karaa si ay kuu caawiyaan haddii loo baahdo.

ReliaCard waxaa bixiya Ururka Qaranka ee Bangiga Dhexe Mareykanka iyadoo la raacayo shatiga VISA U.S.A. Inc. ©2018 ee Bangiga Mareykanka. Xubin FDIC.